

Dugsiyada Madaxa Bannaan ee 742
Badbaadada Ardayga: Manhajka, Shaqaalaha, iyo Isgaadhsiinta
La xiriira Nidaamka Biyaha iyo Dhaqannada

Manhajka

1. Dabaasha waa la sii wadi doonaa oo waa sharci khasab ah oo ka mid ah barnaamijka waxbarashada jirdhiska. Waxaa loo sameyn karaa sababo diineed/dhaqameed hadii ay waalidka/mas'uulka ay ka codsadaan Kooxda MTSS ee dugsiiga.
2. Wax-ka-beddelan ayaa loo abuuri doonaa kuwa aan dabbaalaneyn iyo gaar ahaan kuwa aan dabbaasha ee aan ku hadlin Ingiriisiga.
 - A. Qayba yaryar (qiyaastii 10 arday) oo barashada dabaasha ayaa laga bixin doonaa dugsiyada dhexe iyada oo la raacayo waxbarashooyinka caadiga ah.
 - B. Waxaa diiradda la saarayaa in fasal kasta la baro xirfadaha looga badbaado biyaha iyo xirfadada dabaasha ee aasaasiga ah.
 - C. Barnaamijka Dabbaasha ee (DAPE) ayaa loogu talagalay ardayda naafada ah ee ay muujiyeen in ay qabaan baahi waa sida ay u aqoonsadeen kooxda IEP.

Shaqaalaha

1. Macallimiinta

- A. Dhamaan macallimiinta waxbarashada jimicsiga ee barayya dabaasha waxaa looga baahan doonaa inay haayaan shahaadada badbaadinta iyo shahaadada CPR.
- B. Shahaadada CPR iyo shahaadada badbaadinta waxay u baahan tahay in la cusbooneysiyo labadii sanaba mar, iyada la raacayo shuruudaha Laanqayrta Cas.

2. Badbaadiye

- A. Waxaa goobta ku sugnaan doona qof haysta shahaadada Laanqayrta Cas ee badbaadinta iyo macalinka caadiga ah fasal kasta. Waxaa dhici karta in la waayo qof Badbaadiye ah, dugsiiga wuxuu idin siinayaa fursad loo isticmaalo shaqaalaha jirdhiska oo loo tababaray inay wax badbaadiyan.
- B. Badbaadiye haysta shahaadada badbaadinta ee Laanqayrta Cas ayaa goobta ku sugnaan doona dhammaan xisaddaha dheeraatka ah iyo xilliyada kale ee dabaasha. Qofkani wuxuu noqon karaa tababare ama wuxuu noqon karaa qof kale oo dheeraad ah iyo macalinka caadiga ah.
- C. Waxaa loogu talagalay Fasallada P.E. (DAPE), macalinka DAPE oo haysta shahaadada Laanqayrta Cas ee badbaadinta ayaa goobta joogae. Ardaydu waxay heli doonaan in hal-hal loo taageero inta ay biyaha ku jiraan. Macalinka DAPE wuxuu ku jiri karaa barkadda ardayga si uu u barto oo u muujiyo xirfadihiisa

illaa inta uu jiro qof weyn oo ag jooga si uu ula socdo. Ma dhici karto wax ka badan shan arday in ay wada galaan. Haddii ay jiraan in ka badan shan arday oo kooxda ka mid ah, waa in uu joogaa shaqaale haysta shahaadada badbaadinta ee Laanqayrta Cas, marka lagu daro macallinka DAPE. Tirada ugu badan ee ardayda la siinayya taageerada hal-hal ayaa noqon doonta 10 waqti kasta oo la siinayyo taageero.

3. Degmadu waxay sii wadi doontaa farsamooyinka ku saabsan ilaalinta Hawlaha Barkadda ee degmada.

Isgaadhsiinta iyo Dib u eegista

1. Qoraal oo ku saabsan tilmaamahan, nidaamyada, iyo ficilada ayaa waxaa waalidiinta la siin doonaa sannad kasta.
2. Nidaamyadaaniyoficilladan waxaa dib loo eegi doonaa seddexdii sanaba mar iyada oo hoos imaanaysa Iskuduwaha Badbaadada iyo Amniga.

Nidaamka iyo Dhaganka Barkadda

1. Dhammaan albaabbada barkadda ayaa la xirayaa marka barkadda aan la isticmaalayn.
2. Ardayda looma ogolaan doono goobta barkadda iyada oo aan joogin macallin ama Badbaadiye.
3. Ardayda dhammaantood waxay helayaan wacyigelin si ay u buuxiyaan shuruudaha amaanka (luqaddooda marka ay suurtagal tahay). Waxay sidoo kale noqon doonaan kuwo horay loo tijaabiyey si loo ogaado xirfadahooda dabaasha. Ardayda aan xirfad laheyn waxay joogi doonaan meel biyaheedu ay yaryihiin ama waxaa loo qoondeenayaa fasal khaas.

Ardayda sannadka afaraad, eexirfadooda hooseyso waxaa lagu dhiirrigelin doonaa inay xirtaan jaakadaha nolasha lagu badbaadiyo.

4. Marka laga soo tago xaadarinta koobaat, tira koob ayaa la sameyn doonaa inta lagu jiro xisadda, iyo tira koob kale ayaa la qaadi doonaa dhammaadka xisadda. Ilaaleyuhu waxay si joogto ah u xisaabi doonaa ardayda inta lagu jiro xisadda.
5. Tilmaam waxbarasho oo toos ah ayaa dhici doonta iyagoo kooxo ama kooxo yaryar ah.
6. Nidaamka ka siman ayaa loo isticmaali doonaa dhammaan dugsiyada. Wada-hawlgalayaasha waxaa la barayaa in ay soo buuxiyaa warbixin joogta ah oo wada-jir ah isla markaana u sheegaan badbaadiyaha.
7. Fasalka kadib, waa inuu macalinka socod ku maraa agagaarka barkadda si loo sameeyo kormeer muuqaal ah si loo hubiyo in dhammaan ardaydu ay

ka baxeen biyaha oo ay ka soo baxeen aaga barkadda, iyo inay hubiyaan in aagga barkadda uu san oo lin wax qalab ah, iwm.

8. Tababaraha ayaa marka uu ka baxo barkadda xiri doona dhamaan albaabada barkadda.